Af-soomaali صومالية

Soonku waa labo qaybood:

Waajib: soonka Ramadaan, soonka kafaaro-gudka iyo soonka nadarka.

Sunne: Wixii intaa ka soo haray,

Qeexitaanka soonka: Waa in Ilaahay (C.W.J) lagu caabudo ka-af-qabsiga: cuntada, cabbitaanka iyo dhammaan waxyaabaha wax afuriya, laga bilaabo dillaaca waaga runta ah ilaa ay qorraxdu ka dhacayso.

Soonku labo tiir ayuu leeyahay:

1 Niyaysi

Niyada faralka	Niyada soonka sunnaha ah
Waxaanan laga maarmayn in niyada soonka faralka ah la gunto (la niyoodo) habeenkii -waaga ka hor- guntidda niyada soonkana waxaa ku filan niyaysiga in bisha Ramadaan ay soo gashay. In niyada lagu dhawaaqana waa bidco.	Waxay ansaxaysaa saacad kasta oo maalinka ka mid ah, haddii aanu la iman waxyaabaha wax afuriya, laakin haddii uu niyada gunto ajar ayuu ka helayaa.

2 ka-af-qabsiga waxaabaha wax afuriya.



Waxyaabaha soonka buriya:

1.cunitaanka iyo cabitaanka hab kas ah, qofkii hilmaan ku cuna ama ku cabana soonkiisu waa sax. 2.Jimaaca (Galmada), haddii uu dhaco maalinka Ramadaan soonkuna uu waajib ku yahay qofka, waxaa ku waajibaysa kafaaro culus. 3.Manida oo qofku iska keeno. 4.Wixii la micne ah cuntada iyo cabitaanka, sida irbadaha nafaqada. 5.In dhiig la isaga keeno toobid. 6.In kas la isooga matajiyo. 7.Imaanshaha dhiigga caadad iyo dhalmada.

Wax ka mid ah waxyaabaha loo baneeyay soomanaha

- Dhadhaminta cuntada hadii ay baahidu keento.
- Liqidda candhuufta.
- Qabaysiga.
- Cadayga.
- Iscadrinta.
- Isqaboojinta.

Shuruudda uu soonku ku waajibo

1. Islaamnimo.
2. Garaad (Caqli)
3. Qaan-gaarid, qofka aan qaangaarinna waxaa la jeclaysiinayaa (lagu boorrinayaa) soonka, waxaana faraya masuulkiisa (waalidkii).
4.Negaansho: soonku ku waajibi mayo qofka taraagga ah, waxaana haboon in uu soomo haddii aanu soonku culays ku ahayn, waayo waa sidii uu rasuulku ﷺ samayn jiray, sidoo kale waxaa ku sugan bari-yeeliida dimada qofka waajibku fuulay, waxaa kale oo ku sugan garawshaha badliga bisha Ramadaan.
5. Caafimaad-qab.
6. La'aanta dhiigagga caadada iyo dhalmada.

Waxyaabha ka xaaraanta ah qofka sooman:

1. Liqidda xaakada, noonkana jebin mayso.
2. Dhunkashada, qofka aan looga aamin ahayn in uu soonku ka fasahaado. 3. Hadalka beenta ah (waana fal xaaraan ah).
4. Af-xumada. 5. Xariirinta soonka (waa inaanu soomin labo maalmood oo is xiga).

Waxyaabaha soonka loo kahdo:

1.In lagu talax-tago luq-luqashada iyo sandaarsiga.
2.Dhadhaminta cuntada baahi la'aan

sarhaan.com
mahadsunnah.com
هيئة سرحان